



Milkiilaha Gurigeygu Sidaa Ma Sameyn Karaa?

❖ Akhri tan haddii aad ku nooshahay gobolka Washington oo keliya.

Waxaan ka codsaday milkiilahayga qorshaha lacag bixinta si aan u bixiyo debaajigayga. Milkiilahaygu ma i diidi karaa?

Waa laga yaabaa.

Badanaa milkiiluhu waa in uu ogolaadaa in aad kolba in bixisid lacagta deebaajigaaga, khidmadaha aan la soo celin karin, iyo kirada bisha ugu dambeysa.

Mulkiilahaagu wuu diidi karaa dalabkaaga qorshaha lacag bixinta haddii tirada guud ee debaajiga iyo khidmadaha aan la soo celineyn aysan ka badnayn 25 boqolkiiba kirada bisha ugu horreysa, mulkiilahana uusan kaa dooneynin in aad bixiso kirada bishii ugu dambeysay markaad guriga u soo guureyso. Akhri Kireystayaashu Inta Badan Hadda Waxay u Bixin Karaan Kolba in Kharashka soo Guuritaanka (Tenants Can Now Pay Most Move-In Costs in Installments). Waxaa laga heli karaa Washingtonlawhelp.org.

Milkiilahu ma iga xiran karaa guriga?

Maya. Wax kastoo dhaca, mulkiilahaagu kaama xiran karo guriga. Mulkiilahaagu ma sameyn karo

- In uu beddelo qufullada
- ku kordhiyo qufullo cusub
- Sinaba uu kaa hor istaagin in aad soo gasho guriga
- Kaa xirto guriga xitaa haddii aad kirada la soo daahdid

❖ Mulkiilahu waa inuu ka xereeyaa maxkamada dacwada guri ka saarida, waana in uu ku guuleystaa amar maxkamadeed oo ay ku siinayso ogolaansho ah in uu guriga kaa saaro.

Mulkiilahu ma iga jari karaa korantada, gaaska, biyaha iyo wixii soo raaca?

Waxaa laga jari karaa marka la dayactirayo oo kaliya. Mulkiilahaagu kaagama jari karo korantada, gaaska, biyaha iyo wixii soo raaca

- Sababta oo ah waxaad la daahday kiradii.
- Si uu iskugu dayo in uu guriga kaa saaro.

Sidoo kale waa sharci darro in mulkiilahaagu biilasha u bixin waayo si lagaaga jaro korantada, gaaska, biyaha iyo wixii soo raaca.

Waxaad mulkiilahaaga ka dacweyn kartaa maxkamad haddii uu kaa jaro korantada, gaaska, biyaha iyo wixii soo raaca. Haddii aad guuleysato, garsooruhu wuxuu kugu abaalmarin karaa ilaa \$100 maalin kasta oo aadan haysanin koranto, gaas, biyo iyo wixii soo raaca.

Mulkiilahaygu ma qaadan karaa hantidayda?

Wuxuu qaadan karaa oo kaliya haddii aad dayacday guriga. Sida ku xusan sharciga gobolka, waad dayacday guriga hadii labadan arrimood oo **kaliya** ay run yihiin:

- Dib ula dhacday bixinta kirada
- In aad mulkiilahaaga ugu sheegtay eray ahaan, ficilo ama qoraal in aad guureyso.

Waa sharci darro mulkiilahaaga in uu ku daro heshiiska kirada inay qaadan karaan hantidaada.

Haddii mulkiilahaagu uu alaabtaada qaato, qoraal kula xiriir mulkiilaha. Haddii aadan alaabtaada sidaas ku helin, wac booliiska. Waxaad mulkiilahaaga ka dacweyn kartaa maxkamad si aad ugu khasbato in uu alaabtaada dib kuugu soo celiyo. Garsooruhu wuxuu kugu abaalmarin karaa \$500 maalin kasta oo mulkiilahaagu kaa haystay alaabtaada ugu badnaan, ilaa \$5,000.

Milkiiluhu miyuu iga kirayn karaa meel sharci gudub ka jiro?

Mulkiileyaasha ma kirayn karaan hanti leh qodobyoo sharci oo la jabiyay. Waad dacwayn kartaa milkiilaha haddii uu kaa kireyay guriga isaga oo og inay jiraan qodobo sharci oo lagu xad gudbay.

Milkiiluhu ma iga aargoosan karaa?

Mulkiilahaagu kaama “aargoosan” karo (kaama aar gudan karo) madaama aad talaabo sharci ah la tiigsatay.

Waxyaabaha qaarkood ee keeni kara aargoosasho:

Tusaale 1: Waxaad gudida magaalada u soo sheegtay in dalool weyn uu ku yaalo saqafkaaga. Gudidii ayaa milkiilaha ogeysiisay in ay baarayaan gurigaaga. Mulkiilahaagu wuxuu markaa kuu sheegay in uu kirada kugu kordhin doono.

Tusaale 2: Waxaad ogaysiisay mulkiilahaaga in aad kirada ka jari doonto kharashka aad ku dayactirtay guriga. Markuu ogeysiintaadii helay, ayuu mulkiilahaagu kulayliyihii kaa xiray. Kuleyliyaahaagu wax xiriir ah lama lahayn dayactirka aad ubaahneyd.

Haddii mulkiilahaagu uu ku kaco tallaabo liddi kugu ah 90 maalmood gudahood marka aad ku qaaday talaabo sharci ah kadib, waxaa loo tixgelin karaa in ay tahay aargudasho sharci darro ah. La hadal qareen haddii aad u maleyneyso in mulkiiluhu si sharci darro ah kaaga argoostay. Waxaad awoodaa kartaa in aad dacweysid.

Mulkiiluhu ma diidi karaa inuu aqbalo kirada inaan ku bixiyo lacag cadaan ah?

Mulkiiluhu wuu diidi karaa inuu kirada ku qaato lacag cadaan ah. Haddii mulkiiluhu aqbalo inuu kirada ku qaato lacag cadaan ah, waa inuu rasiid ku siiyo.

Haddii aad sidaas weydiisato, mulkiiluhu waa inuu ku siiyaa caddeyn qoraal ah wixii lacag ah ee aad bixisay.

Raadso Caawinaad Sharci

- Wixii ka baxsan King County, ka wac khadka tooska ah ee 'CLEAR Hotline' oo ah 1-888-201-1014 maalmaha shaqada inta u dhaxaysa 9:15 subaxnimo ilaa 12:15 duhurnimo.
- King County gudaheeda, wac 2-1-1 maalmaha shaqada inta u dhexeysa 8:00 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo. Waxay kuu gudbin doonaan qof ku siiya caawimo sharci.
- Waayeellada (da'doodu tahay 60 sano iyo wixii ka weyn) waxay ayaguna wici karaan CLEAR * Sr taleefankoodu yahay 1-888-387-7111 (gobolka oo dhan).
- Waxaad kale oo aad arjiga online uga dalban kartaa CLEAR*Online: nwjustice.org/get-legal-help.

Daabacaadan waxay ku siinaysaa macluumaad guud oo ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga. Looguma talogalin in lagu beddelo talo sharciyeed oo gaar ah.

© 2019 Northwest Justice Project — 1-888-201-1014.

(Ogolaashaha in la koobiyeeyo iyo qaybinta dhokumentigaan waxaa la siiyey Isbahaysiga Sinnaanta Caddaaladda (Alliance for Equal Justice) iyo shakhsiyaadka aan ka ganacsaneyn oo keliya.)